

UJEEDO: WAKAALAD GUUD "PROCURO DE GENERALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **11/05/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Tajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXISO:- SUCAADO CALI BALIIL CUMAR, Hooyo Maryan Cumar Xuseen, Somali ah, Ku Dhalatay: Muqdisho, Sanadkii: 01-01-1987, Sidata Warqadda Sugnaanta, Lr. 831353, Kana soo baxay Dowladda Hoose ee Muqdisho

DAMIIN AQOON:- ABDIKARIM MOHAMED ALI, Somali ah, Ku Dhashay ISIOLO, Sanadkii: 07-01-1991, Sita Kenyan passport, Lr. AK0930854

LA WAKIISHE:- MARYAN OMAR HUSSEIN, Hooyo Faadumo Nur Hassan, Somali ah, Ku Dhalatay: Muqdisho, Sanadkii: 01-01-1956, Degan Balcad, Sidata Somali Passport, Lr. P01583095

B- Aniga oo ah **SUCAADO CALI BALIIL CUMAR**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay Hooyadeey **MARYAN OMAR HUSSEIN** una wakiishay qaybta dhaxalka ah ee aan ku leeyahay dhamaan hantida aan ka dhaxlaayo Aabaheey Marxuum **Cali Baliil Cumar** kuna qoran magaciisa mood iyo noolba leh, iyo sidoo kale qaybta dhaxalka ah ee aan ku leeyahay Aabaheey Marxuum **CALI BALIIL CUMAR**, oo isaguna sii dhaxlaya dhamaan Wax Alaale Wixii Hanti ah uu Lahaa kana geeriyooday Aabihiis Marxuum **BALIIL CUMAR ABTOW** kuna Qoran Magaciisa Mood & Noolba leh, kuna taala Gobolka Banaadir & Gobolada kale ee dalka, sida guri, dhul banaan, goof, beer, Gaadiid, sheer shirkadeed, I.W.M.

Waxaana si buuxda ugu wakiishay in ay ii Xafidi karto, dayactiri karto, Gadi karto, kireeyn karto, dhisi karto, Qareen ii Qaban karto hadii loo baahdo, Xanaaneyn karto, igu matali karto magaceyga dhan kasta la iiga baahdo, iigana doodi karto maxkamadaha dalka darajadooda kala duwan, iina sameen karto waraaqaha dhaxalkoobka ah, isla markaasna ii saxiixi karto kaalinteyda ku aadan dhamaan waraaqaha la iiga baahdo suul iyo saxiixba sida waraaqaha dhaxalkoobka ah, una idman tahay in ay si buuxda Maxkamaddaha hortooda iiga Doodi karto, insha'allaahu, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **MARYAN OMAR HUSSEIN** awoodaas aan siiyay ay u madax banaan tahay oo aniga Qeyb dhaxaleedkaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **ABDIKARIM MOHAMED ALI**, Waxaan Cadaynayaa in aan Damiinu Aqoon ka ahay Wakaalad Bixisada Lagu Magacaabo **SUCAADO CALI BALIIL CUMAR**.

J- Aniga oo ah **MARYAN OMAR HUSSEIN**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiisay Gabadheyda **SUCAADO CALI BALIIL CUMAR**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA

SUCAADO CALI BALIIL CUMAR



SAXIIXA DAMIIN AQOONSIGA

ABDIKARIM MOHAMED ALI



SAXIIXA LA WAKIISHAHA

MARYAN OMAR HUSSEIN



SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- ABDULLAHI ALI MOHAMED

2- ABDULLAHI ABDIRIZACK JAMA



(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1573/T.P.N/25, Tr. 11/05/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- SUCAADO CALI BALIIL CUMAR** Ahna (Wakaalad Bixiso), **2- ABDIKARIM MOHAMED ALI** Ahna (Damiinu-Aqoon), **3- MARYAN OMAR HUSSEIN** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"






FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 17/05/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Maryan Cumar Xuseen** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Guud ee **Rep No. 1573/T.P.N/25**, Tr. **11/05/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	Maryan Cumar Xuseen
Nooca	Wakaalad Guud
Loo Wakiishay	Dhamaan Hantida Wakaalad Bixisada Sucaado Cali Baliil Cumar
Taariikhda Wakaalada	11/05/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **Maryan Cumar Xuseen**, Leh Tel No. **0615808265**, Degan **Balcad** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Maryan Cumar Xuseen